

Minnesota waxaa jira wax ka badan 10,000 oo sababood oo aad ugu baahan tahay in aad hesho ceymis caafimaad.



Waxaa iminka jira hal meel oo aad ka heli karto

MNSure waa suuq furan oo ceymiska caafimaadka ay ganacstada yaryar ka heli karaan, dooran karaan, is barbardhigi karaan si y u helaan ceymis caafimaad oo munasib ku ah miisaaniyadooda iyo baahida shaqaalaha.

Ka iibso ceymiska caafimaadka oo u bandhig shaqaalahaaga. Ceymiska caafimaadka ee kala duwan iyo shirkadaha oo aad dhamaantood ka heleyso hal goob oo kaliya. Haddii aadan awood u laheyn in aad siiso shaqaalahaaga ceymiska caafimaadka, waxa aad u soo diri kartaan MNSure si ay uga codsadaan ceymiska caafimaadka iyo gargaarka maaliyadeed.

Dooro, Qiimee, Munaasibna ku ah

MNSure waxa ay isbedel ku sameyneysaa habka ganacstada yaryar u iibsadaan gceymiska caafimaadka.

Doorashada: Hal meel oo aad kla heli karto ceymiska caafimaadka oo ka doorataan laba ka mid ah shirkadaha ceymiska caafimaadka.

Macluumaad si cad loo dhigay: Goobta waxaa si cad loogu qeexayaa ceymis kasta oo caafimaadka ah oo si fudud loo dhigay oo la is dhinac dhigay si la isula barbardhigo.

Maamulka oo aad loo fududeeyey: Hal biil oo bil kasta iyada oo aan loo eegin ceymiska caafimaadka kala duwan ee shaqaalahaagu doortaan, iyo hab barta

internetka ah oo aad wax kaga bedeli karto kana maarfeyn karto ganacsigaaga iyo macluumaadka shaqaalaha.

Ceymis Caafimaad oo tayo sare leh: Ceymis kasta waxaa laga helaa daryeel caafimaad ee booqashada dhakhtarka, isbitaalka, daryeelka dhalmada, daawada dhakhtarku qoro, cudurada dhimirka, ka hortagga caafimaadka, garaagrka derdegga ah, Ceymiska ilkaha ayaa sidoo kale laga heli karaa.

Caawinaadda: Ka iibso bartya internetka ee MNSure.org, waxa aad la sahqeysaa wakiil/dulaal degaanka ah ama xafiisyada bulshada oo ha kuu fidiyaan caawinaadda aad u baahan tahay kuuna fidiyaan shaqaale tababaran oo ka tirsan xarunta macaamiisha ee MNSure (1-855-3MNSURE).



MNSureSM

Where you choose health coverage



Taariikhaha muhimka ah

1da Oktoobar 2013

Bilowga diiwaan gelinta.

15ka Nofeembar - 15ka Diseembar, 2013

Is diiwaangelin gaar ah oo loo sameeyo ganacsatada yaryar: Shuruudaha ka qeyb qaadashada iyo wax ku darshada oo laga cafiyo qaarkood..

1da Janaayo 2014

Ceymiska caafimaadka aya bilaabanaya, qof kasta waxaasharciga dawladda dhexe waajib ka dhigayaa inuu leeyahay ceymis caafimaad.

Waxa ay cilmi baaristu muujisay in mulkiilayaasha ganacsiga yaryar ay mas'uul ka yihiin daryeelka shaqaalahooda, iyo helitaanka ceymiska caafimaadka. ee dhinacooda ah.

Warbixinta Cilmi Barista uuqgeynta ee Salter Mitchell Report, August 2012.

Maxay MNSure u qaban kartaa ganacsata?

Waxaa ka qeyb qaadan kara goobaha ay ka shaqeeyaan 2-50 shaqaale ah. Goobta ganacsiga waa:

- Ugu yaraan u soo bandhigtaa ceymis cafimaad dhamaan shaqaalaha joogtada uga shaqeeya.
- Xafiiska laga maamulo ka furan yahay gobolka Minnesota.
ama
- U soo bandhiga ceymiska caafimaadka shaqaalaha xaqa u leh oo goobtoodu shaqadii ay tahay Minnesota.

Hababka lagu heli karo ceymiska caafimaadka

MNSure waxa ay idin sineysaa fusad aad ku kala doorataan oo aad ku xkameysaan kharashka ceymiska si aad shaqaalhiina ugu soo bandhigtaan fursadaha kala duwan:

1. **Doorashada kala duwan** — Adiga ayaa goynaya lacagta aad bixin karto ou set the dollar amount you'll ee ceymiska caafimaadka ee bil kasta ka dibna shaqaalahaagu kala doortaan ceymis kasta oo laga heli karo MNSure.
2. **Heerar kala sareeya** — Waxa aad dooraneysaa ceymiska caafimaadka ee hal heer kaliya (sida, qalinka, silfarka, dahabiga) adiga oo u ogolaanaya in shaqaal;uho kala doortaan ceymiska caafimaadka iyo shirkadaha caafimaadka ee heerka ay doonayaan.
3. **Qorshe kaliya** — Adiga ayaa dooranaya shirkadda ceymiska caafimaadka iyo ceymiska caafimaadka ee shaqaalahaaga.

Yareynta Kharashkaaga caafimaadka

Kharashka aad bixiso inuu yaraado ayaad MNSure xaq u yeelan kartaa taasoo yareyneysa canshuur dhaaf yareyn kara kharashkaaga caafimadaka ee ganacsiga ay ka shaqeeyaan wax ka yar 25 shaqaale, ee ka iibsada ceymiska MNSure, waxaa suurogal ah in ay xaq u yeeshaan canshuur dhaaf ka caawiya bixinta ceymiska caafimaadka ee shaqaalaha Laga bilaabo sanadaka 2014. canshuur dhaafku waxa uu bixinayaa ilaa 50 boqolkiiba lacagta uu ganacsigu ka bixiyo ceymiska shaqaalaha ee bil kata ee hay'adaha canshuurta bixiya ama ilaa 35 boqolkiiba hay'adaha aan canshuurta laga qaadin (laga dhaafay) Si ay taas xaq ugu yeeshaan, waa in ganacsigu:

- U fidiyaa ceymiska caafimaadka shaqaalhiisa.
- Bixiyaa ugu yaraan 50 boqolkiiba kharashka bil kasta ceymiska caafimaadka ee shaqaalaha.
- Bixiyaa celcelis ahaan sanadkii mushahar ka yar \$50,000.

Soo booqo <http://www.irs.gov/uac/Small-Business-Canshuur-dhaafka-caafimaadka-ee-ganacsiga-yaryar-ee-Macluumaad-dheeraad-ama-wixii-la-tashi-la-xiriir-canshuur-diyaariyahaaga>.

Macluumaad dheeraad iyo waxyaabaha ku soo kordha waxa aad ka heli kartaa MNSure.org

**La soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah oo laba af oo kala duwan looga hadlo:
1-855-3MNSURE (1-855-366-7873)**

La xiriir wakiilka/dulaalka ama la soo xiriir MNSure si aad u ogaato sida aad ku heli karto wakiil rasmi ah ama hay'adaha bulshada ee la shaqeynaya MNSure.